



Xafiiska Qarammada Midoobay u Qaabilsan Arrimaha Siyaasadda Soomaaliya (UNPOS)

WAR-SAXAAFADEED 017/2009

SRSGa oo ku eedeeyey dagaalyahaniin Soomaaliyeed inay qaadeen Isu day Afgembi

Nayroobi, 13 May 2009 - Ergayga Gaarka ee Qaramadda Midoway ee Soomaaliya, Axmed Ould-Abdallah ayaa ku ee deeyey kuwa dhawaan weerarada ku qaaday Xamar inay isku dayayaan inay Afgembiyaan Xukuumad Sharci ah iyagoo adeegsanaaya xoog.

“Waa in bulshada caalamka iyo ururo goboleedyadaba ay si aad u cambaareeyaan arintan” ayuu yiri Mr Ould-Abdalla.

“Nimankaan xagjirka ah waxay og yihiin in aynan haysanin taageerada dadka Soomaaliyeed sidaasi darteed ayey u keensadeen niman ajanbi ah oo dagaalyahiniin ah kuwaasoo aan ku xirneen xaalka Soomaaliya si kastoo arintu ahaatoba.

“Sida markii hore ay ku andacoon jireen kooxdani, Weerarooda loolama dan lahayn Ciidamda Ethiopia laakiin waxaa loola dan lahaa in lagu gaaro qorshe kale oo ka duwan kan”

“Isla shaqsiyaadkii diiday wadahal sanadkii 2006, oo ilaa iyo haddana diidan wadahalka ayaa mar labaad isku dayaya inay burbur hor leh geliyaan dadkooda”

“Waxaan dareensanahay in kumananaan dad ah xoog looga bixiyey guryahooda lagana barakiciyey meelo badan oo ku yaala Moqdishu, sida Xaafadaha Towfiiq, Cali-kamiin, Suuq-Bacaad iyo Istadium Moqdishu waxaana dadkaasi barakiciyey isla kuwan weeraraka soo qaaday.

Ergayga Gaarka ah ee Qaramadda Midooway wuxuu yiri Shaqsiyaadka iyo Hay’adaha ka dambeeya dagaalyahannadan waa la yaqaanaa maalin maalmaha ka mid waxay hortagi doonaan sharciga dhoowaa ama dheeraaba”

Qas wadayaasha waxay u hawlgaleen inay burburiyaan nolosha shaqsiyaadka Soomaaliyeed isla markaana ay degaansho la’aan ku faafiyaan gobolka”

Wixii war dheeraad ah fadlan la xiriir: Susannah Price / Donna Cusumano,
Public Information Officers, UN Political Office for Somalia (Nairobi, Kenya)

Tel: +254 20 762 7132 / 7133 or +254 733902020 / 737400133

Fadlan booqo: www.UN-Somalia.org